

# FASALKA 12NAAD JADWALKA WAQTIGA

## **SEBTAMBAR** WAXYALAHA DHAMMAAN KU SAABSAN FAFSA / DHAMMAAN KU SABASAN WASFA

U diyaar garow inaad codsato FAFSA ama WASFA markaas waxaad u diyaar tahay marka codiyada furmayaana Oktoobar 1.

## **OKTOOBAR** QAYBAHA CODSIGA KULLIYADA

Codsi kasta oo kulliyadu waxa uu yeelan doonaa shuruudo kala duwan. Garo waxa aad u baahantahay si aad u diyaariso codsigaaga.

## **NOOFAMBAR** SIDA LOO CODSADO

Go'aanso waxay tahay tallaabooyinka aad u baahantahay inaadku dhammaystiro codsiyadaada kulliyada.

## **DIISAMBAR** DEEQAHA WAXBARASHADDA

Cilmi baadhid ku samee oo codso deeq waxbarashoo HADDA.

## **JANAAYO** HELIDA DEEQDA WAXBARASHO EE BOUND COLLEGE

Markaas, waxaad haysataa Bound College: Baro sida Deeqda waxbarashada Bound College ay kaaga caawin doonto inaad bixiso lacaga kulliyada.

## **FEBRAAYO** FAHANKA WARQADDAHA ABAAL MARINTA KAALMADA DHAQAALAHA

Fahan warqaddaada abaal marinta kaalmada dhaqaalaha iyo sida loo go'aamiyo tallaabooyinkaaga xiga.

## **MAARSO** GAADHIDA GO'AANADAADA

Hadda oo aad heshay warqaddahaaga aqbalaada, go'aan ka gaadh kulliyada doorashada fiican kuu ah ADIGA!

## **ABRIIL** U WAREEGIDA KULLIYADA

Hubso inaad dhammaystirtay wax kasta oo aad u baahantahay si aad isugu diiwaangeliso kulliyada aad dooratay.

## **MAAYO** WAXAANU FILAYNAA TEERAMKAAGA U HOREEYA / ILAHA KULLIYADA EE AAD U BAAHANTAHAY INAAD ISTICMAASHO

Kulliyadu aad ayay uga duwantahay dugsiga sare. Qorshee ilaha kala duwan ee kulliyada ee ku caawin doona hayso sanad guuleh sanadka koowaad.

# 3 DEEQDA WAXBAARASHO EE COLLEGE BOUND:

## HELIDA IYADDA

**Waad qalan jebinaysaa oo waxaad tegaysa akulliyada.** Waa wakhtiga la bilaabayo in laga fekerro wax ku saabsan waxa aad u baahantahay inaad samayso si aad u hesho Deeqda Waxbarasho ee College Bound. Waxaa jira foomam la buuxinayo iyo muddooyinka si loo buuxiyo, oo waa muhiim adiga iyo qoyskaagu inaad fahantaan nidaamka.

## MAXAAN U BAAHANAHAY INAAN SAMEEYO:

1. Buuxi shuruudaha Deeqada Waxbarasho ee Bound College.

2. Soo xaree **FAFSA** ama **WASFA**. Waxaad soo gudbin kartaa goor hore sida Oktoobar 1 sanadkaaga sare. Xusuuso in kulliyad kasta ay leeyihiin muddooyinkooda ay qabteen ee kaalmada dhaqaale ee aad raacayso.

3. Laguu oggolaado inaad iska diiwaangeliso kulliyad gudaha Washington gudaha hal sano oo qalan jebinta dugsiga sare ah.

4. Ahaw qof muwaadin Maraykan ah, qof u qalma oo aan muwaadin ahayn, ama qof buuxiyay shuruudaha degganaanshaha ee gobolka.

## MAXAA DHACAY MARKA XIGTA:

- College Bound ayaa si otomaatig ah kuu tilmaami doona inaad tahay arday College Bound Jecel dhammaan kulliyadihii aad ku soo qortay FAFSA ama WASFA

## KULLIYADAADU MAXAY QABAN DOONTAA?

1. **Go'aan** ka gaadh haddii dakhligaagu buuxiyo tilmaamaha u qalmida.

2. **Xisaabi** abaalmarintaada kaalmada dhaqaale.

3. **Dir** warqadaada abaalmarinta kaalmada (iimayl ahaan ama boostadda) addoo sheegaya inta ay leegtahay kaalmada dhaqaale ee aad heli doonto.

4. **Ku kharash garee** kaalmadaada **dhaqaale**


adigu, ay ku jirto Deeqda Waxbarasho oo Bound College, ka hor inta aanay fasaladu bilaabin.

## WANAAGSAN IN LA OGAADO:

Ardayda waxay ku codsan kareen College Bound ee dugsiga dhexe ka hor dhammaadka sannadka fasalkooda 8aad oo ay ka go'antahay buuxinta Balanqaadka College Bound ee dugsiga sare si ay u helaan deeqda waxbarashada. Warqadaada abaalmarinta, Deeqda waxbarashada College

Bound wuxuu isugu jiraa **gargaarka kale dhaqaalaha gobolka** oo lagu daboolayo **waxbarida** oo qiimooyinka bulshada, qaar ka mid ah **qidmooyinka**, iyo \$500 oo gunnada buugga.

**JANAAYO:** FASALKA 11 iyo 12

 **Ma qabtaa su'aalo** ku saabsan Deeqda waxbarashada College Bound? Soo wac **888-535-0747 (doorashada 1)** ama iimayl **collegebound@wsac.wa.gov**



**pcccr**  
Puget Sound College and Career Network

Road Map  
Project 

 WASHINGTON STUDENT  
ACHIEVEMENT COUNCIL  
EDUCATION · OPPORTUNITY · RESULTS

**WCAN** WASHINGTON  
COLLEGE ACCESS NETWORK

**COLLEGE  
SUCCESS  
FOUNDATION**

# 4 LAGU BIXINAYO KULLIYADA: DEEQDA

## WAXBARASHO

### MAXAY TAHAY DEEQAHA WAXBARASHO?

Lacagta abaal marinta deeqda waxbarasho ee kharashyada waxbarashadda ku salaysan heerka sida tacliinta, ciyaaraha fudud, adeega bulshadda ama baahida dhaqaale. Ururada bulshadda, kulliyadaha, machadyada diinta iyo shirkadaha gaarka ah waa tusaalooyinka bixiyayaasha deeqda waxbarasho.

Iyadoon loo eegin asalka laga soo jeedo ama **heerka sharciga socdaalka**, waxaa dhici karta deeq waxbarasho oo adigu hesho.

### HALKEEN KARAAN INAA KA RAADIYO DEEQAHA WAXBARASHO?

La taiyahaaga dugsiga sare waa meesha fiican ee laga bilaabo. Waa kuwan meelaha qaar laga bilaabo cilmibaaristaada:

TheWashBoard.org: [thewashboard.org](http://thewashboard.org)

FastWeb: [fastweb.com](http://fastweb.com)

Beyond Dreaming Scholarship List: [scholarshipjunkies.org](http://scholarshipjunkies.org)

Kulliyada aad xiisaynaysaa ama ururada maxaliga ah sida Act Six, College Success Foundation iyo Washington State Opportunity Scholarship.

Waxaad mutaysan kartaa mid kamid ah barnaamijyadan gobolka sida College Bound Scholarship (Cutubka 3) ama Passport to Careers.

### SIDEEN U CODSADAA?

- 1. Cilmi baadhid ku samee** deeqaha waxbarasho ee aad u **qalanto** ee.
- 2. Soo gudbi** codsiyadaada **adigu**. Hubso inaad u raacdo tilmaamaha si feejigan!
- 3. Dhammaystir** Codsiga Bilaashka ah ee Kaalmada Ardayga ee Federaaliga (**FAFSA**) ama Codsiga Washington ee Kaalmada Dhaqaale ee Gobolka (**WASFA**).

### MAXAY YIHIIN NOOCYADA DEEQDA WAXBARASHO EE AAN CODSAN KARO?

**Tacliimeed/Meritka:** Iyaddoo ku salaysan GPA, buundooyinka imtixaanka iyo/ama shaqada kooraska

**Ciyaaraha fudud:** Iyaddoo ku salaysan bandhiga ciyaaraha fudud

**Hal abuur leh:** Iyaddoo ku salaysan fanka, muusiga, ciyaarta

**Adeega bulshadda:** Iyaddoo ku salaysan ka qayb galka dugsigaaga ama bulshadda

**Kala duwanaanshaha:** Ku salaysan sinjiga, isirka, dhaxalka qoyska, diinta, qaabka galmada, iwm.

**Baahida:** Ku salaysan baahida dhaqaale

**Kale:** Hogaaminta, ardaygii hore, iwm.

**FEBRAAYO:** FASALKA 11

**DIISAMBAR:** FASALKA 12

### \* SAMEE CILMI BAADHID

**Gudaha deeqda waxbarasho dib loo cusboonaysiin karo?** Haddii Jawaabtu tahay haa, baro wax ku saabsan shuruudaha cusboonaysiinta. Haddii aanahy ahayn, ka feker wax ku saabsan sida aad u beddeli doonta maaliyada sanadka soo socda.

**Ma la qaadi karaa?** Ma qaadan kartaa deeqda waxbarasho adigu haddii aad **beddesho** dugsiyada? Deeqaha waxbarashada qaarkood waxay ku xidhiyihiin kulliyado gaar ah.

# 4 LAGU BIXINAYO KULLIYADA: DHAMMAAN KU SAABSAN FAFSA

## MAXAY TAHAY FAFSA?

**Buuxinta FAFSA waa bilaasha oo waxay ku siisaa gelida goonto ka sii wayn oo kaalmo dhaqaale ah** si aad u bixiso tababarka shaqada, farsamada, 2-sano iyo 4-sano oo kulliyada ah. Iyaddoo ku salaysan macluumaadka aad bixiso, kulliyad kasta waxay xisaabin doontaa abaal marinta kaalmada **dhaqaale**.

Codsiga Xortaha ah ee Kaalmada Ardayga Federaalka (FAFSA) waa tallaabada koowaad ee lagu codsado **kaalamda dhaqaale**.

## GOORMA YAAN COSANAYAA?

Goor hore oo ah **Oktoobar 1 sanadkaaga sare**.

Hubso garo kaalmada dhaqaale **ahmiyada muddada ay dhacayso** wixii ah kulliyadaha aad xiisaynayso.

Waxaad u baahantahay **inaad gudbisno FAFSA sanad kasta** markaad kulliyada ku jirto.

## KUMAA U QALMA INUU CODSADO?

Mudaaninka Maraykanka ah iyo dadka sifada sharciga ah ku degen waa inay buuxiyaan FAFSA.

Qaar ka mid ah arayda aan sharciga lahayn **way**

**galmaan** Codsiga Washington ee Kaalmada Dhaqaalaha Gobolka (**WASFA**). **Ka eeg "Dhammaan waxa ku saabsan WASFA" gormada wixii macluumaad dheeraada ah.**

## MAXAY TAHAY MACLUUMAADKA AAN U BAAHANAHAY INAAN BIXIYO?

**Macluumaadka bilowga ah**, sida magaca sharciga, taariikhda dhalashada, iwm (iyo wixii mid ah).

**Warbixinta daqliga/ canshuurta** dwaalidka iyo ardayga ee la soo dhaafay

## \* HA ILOOBIN:

Hubso inaad qorto jawaabaha su'aalahaaga caqabada ah ee codsiga oo ku kaydi iyaga goobta amniga ah ee aqoonsigaaga FSA.

## MA U BAAHANAHAY AQOONSIGA FSA?

(AQOONSIGA KAALMADA ARDAYGA FEDERAALKKA)

**saxeexaaga sharciga ah.** Adiga IYO hal waalid (waalidka ku dhala ama ku korsada) waxaad u baan doontaa inaad samayso aqoonsiga FSA (magaca isticmaalaha iyo kelmadda sirta ah). Hubso adiga iyo waalidkaaga inaad isticmaashaan iimaylo kala duwan. Haddii waalidkaagu aanu ka diiwaan gashanayn waa inay samaystaan Aqoonsiga FSA. Taa beddel keed waxay daabaci doonaan, saxeex oo boosta ku dir bogga saxeexa.

**Macluumaadkee ayaan ubaahanahay inaan kusameeyo Aqoonsiga FSA?** Macluumaadka bilowga ah, sida

lambarka sooshalka (SSN), magaca sharciga ah, taariikhda dhalashada, macluumaadka xidhiidhka, iwm.

**Aqoonsiga FSA waxa uu ku siiyaa gelita macluumaadka FAFSA oo u adeegaa sidii**

## SIDEEN U BUUXIYAA IYADDA?

1. Samee Aqoonsiga Kaalmada Ardayga Federaalka ah (FSA Aqoonsiga) bogga **fsaid.ed.gov**.
2. Istimmaal Aqoonsiga FSA si aad ku soo gadho oo ku dhammaystirto FAFSA **fafsa.gov**.
3. **Eeg iimaylka kuu sheegaya** inaad ku guulaysatay gudbintii FAFSA.

**MAAYO:** FASALKA 11

**SEBTAMBAR:** FASALKA 12



# 4 LAGU BIXINAYO KULLIYADA: DHAMMAAN

## KU SAABSAN WASFA

### MAXAY TAHAY WASFA?

Codsiga Washington ee Kaalmada Federaalka (WASFA) waa tallaabada koowaad ee lagu codsado **kaalmada dhaqaale** ee qayb ardayda aan sharciga lahayn ah kuwaas oo ku nool gobolka Washington. Buuxinta WASFA waa bilaash oo waxay ku siisaa ardayda u qalanta helida **kaalmo dhaqaale ah** si ay u bixiyaan tababarka shaqada, farsamada, 2-sano iyo 4-sano oo kulliyadaha ku yaala Washington. Aan sharci laheyn ardayda leh ama aan laheyn **(DACA)** w/waxay dhameystiri karaan WASFA.

**Haddii aad tahay Muwaadin Maraykan ah ama qof sifo sharci ah ku degen, ka eeg qormada "Ku saabsan dhammaan FAFSA" oo ha buuxin WASFA.**

### KUMAA U QALMA INUU CODSADO?

**U qalmida** waxay ku salaysantahay **sharciga**

**socdaalka la haysto**. Ardaydu waa inay buuxiyaan shuruudaha barnaamijka degnaanshaha. Waxyaabaha gaarka ah, isticmaal su'aalaha xog qaadista u qalmida ee

[readysetgrad.org/wasfaelig](http://readysetgrad.org/wasfaelig)

### SIDEEN U BUUXIYAA IYADDA?

1. Booqo [readysetgrad.org/wasfa](http://readysetgrad.org/wasfa) oo riix "Bilaw WASFA Cusub."
2. Dhammaystir su'aalaha xog qaadista xaq u lahaanshaha.
3. Samayso kooto oo kaydi erayga soo gelida iyo kelmadda sirta ah.
4. Buuxi oo soo gudbi codsigaaga.

**Maxay tahay saxeexa waalidka ee WASFA?** Waxaad u baahan doontaa inaad iimayl marti qaad ah u dirto mid ka mid waalidka (dhalay ama korsaday) si koronto ahaan loogu saxeexo WASFA. Hubso adiga iyo waalidkaaga inaad isticmaashaan iimaylo kala duwan.

✳ **Ha ilaabin:** Saxeexa waalidkaaga waxaa looga baahan yahay in la dhammaystiro codsigaaga.

✳ **Waalidka waa inay koronto ahaan saxeexaan gudaha 72 saacadood marka la marti qaado.**

### GOORMA AYAAN SAMAYNAYAA?

Soo gudbi goor hore oo ah **Oktoobar 1 sanadkaaga sare.**

Iska hubso **inaad taqaano kaalmada dhaqaalaha** **Ahmiyada muddooyinka liio qabtay** xaga

kulliyada aad xiisaynayso. (Inta badan muddada ay dhacayso WASFA ma qorna, laakiin waxay la mdi tahay muddada ay dhacayso FAFSA.)

Waxaad uga baahantahay **inaad gudbiso WASFA** sanad kasta markaad kulliyada ku jirto.

### MAXAY TAHAY MACLUUMAADKA AAN U BAAHANAHAY?

**Macluumaadka bilowga ah**, sida magaca sharciga, taariikhda dhalashada, iwm.

Waalidka iyo ardayga **cashuurta/macluumaadka dakhliga**

Liiskaaga **kulliyadaha** (kulliyadaha gobolka Washington oo keliya)

Lambarkaaga **DACA haddii aad mid leedahay**

### Miyuu macluumaadkaygu ilaashanyahay?

Gollaha Guul gaadhida Ardayga Washington (WSAC) iyo kulliyadaha hela codsigaaga keliya waxay u isticmaalaan macluumaadka inay go'aansadaan u qalmida kaalmada dhaqaale ee gobolka. Goobaga waxbarasho looma oggola inay isticmaalaan macluumaadka wixii ah ujeedooyinka ama la wadaagaan xogta kooxaha kale.

Haddii aad hayso su'aalo ku sabasan WASFA, kala xidhiidh Washington Student Achievement Council (WSAC) lambarka 1-888-535-0747, doorashada 2 ama iimaylka [wasfa@wsac.wa.gov](mailto:wasfa@wsac.wa.gov).

**MAAYO:** FASALKA 11

**SEBTAMBAR:** FASALKA 12



# 4 LAGU BIXINAYO KULLIYADA: FAHANKA WARQADDAHA ABAAL MARINTA KAALMADA DHAQAALAH

Ka dib markaad soo xarayso FAFSA ama WASFA, waxaad heli doontaa warqadda abaalmarinta kaalmada dhaqaalaha ee ka soo baxday kulliyad kasta oo aad codsatay. Kaalmadaada **dhaqaale** abaalmarin ka timid kulliyad kasta way kala duwanaa doontaa. Ma garan doontid ka uu yahay dugsiga ku habboon miisaaniyadaada ilaa aad dib u eegto DHAMMAAN kaalmadaada dhaqaale **xidhmooyinka** abaalmarinta.

## NOOCYADA AMAAHDA ARDAYGA:

Waxaad dooran kartaa si buuxda ama qayb ahaan inaad u aqbasho noocyada kala duwan ee amaahda la bixiyo ama diid dhammaan iyaga.

**Amaahda kaabbida leh:** Dowladdu waxay bixisaa dulsarka marka aad ku jirto kulliyada. Haddii aad u qalanto, tani waa doorashada ugu wanaagsan.

**Amaahda kaabbida aan alahyn:** Dulsarka waxaa lagu daraa qadarka aad amaahdo sida ugu dhakhsaha badan ee aad bilowdo kulliyada.

**Amaahda walaidka:** Amaahda uu walidkaagu qaadan karo isagoo ku metelaya si uu u bixiyo **kharashkaaga kulliyada**. Walidkaagu waxay sharci ahaan ku xidhan yihiin amaahda iyo dib u bixintooda.

**Amaahda federaalka** waxay leedahay dulsaar aad u hooseeya iyodoorashooyinka dib u bixin kara wanaagsan amaahda gaarka ah oo waxaa go'aamisa FAFSA.

**Amaahda gaarka ah** waxay ka soo noqon kartaa bangiga, kulliyada iyo ururada gaarka ah. Caadi ahaan, waxay leeyihiin qiima dulsaar oo ka sareeya iyo doorashooyinka dib u bixinta ka wanaag yar. Sida amaahda aan la kaabin, amaahda gaarka ah waxay heshaa dulsarka sida ugu dhakhsaha badan ee ad ka amaahato lacagta.

## Waxaan helay warqaddayda abaal marinta, MAXAY HADDA?

- 1. Dib u eeg deeqda** oo barbar dhig kharashka aad u baahantahay inaad daboosho. Kharashyada qaar ku qoran **kharashka soo xaadirka** (COA) waxaa biil u soo diri doona kulliyada (**kharashka waxbarashada**, qolka amna meelaha la wada seexdo, iwm) marka kuwa kale, sida buuggaagta iyo kharashyada gaarka ah ay yihiin qiyaaso lagu taliyay.
- 2. Ogeysii kulliyada isbadela walboo dhaqaalaha** ama deeqaha waxbarashada gaarka ah ee la bixiyay tan iyo gudbintaada **FAFSA ama WASFA**.
- 3. Aqbal abaalmarinta** kulliyada aad codsanayso si aad u xaadarto. Hubso inaad tyaqaano waktiyada ay dhacayso ee aqbalida deeqda kaalmada dhaqaale.

## NOOCYADA KAALMADA DHAQAALAH:

**Deeqaha waxbarasho:** Lacagta lagu abaal mariyo ee ku salaysan tacliinta ama guul gaadhida kale si loo caawiyo lagu bixiyo kharashka waxbarashadda.

**Deeqaha:** Qaabka kaalmada hadiyada, caadi ahaan ku salaysan baahida dhaqaale.

**Daraasada shaqo:** Shaqada ka baxsan goobta waxbarasho ama goobta waxbarasho ee kuu oggolaatra adiga inaad shaqaysato **kharashyada waxbarashadda**.

**Amaahda:** Lacagta aad amaahato ee aad dib u bixinayso wakhti ka dib iyaddoo wadata dulsaar.

## WANAAGSAN IN LA OGAADO:

Aqbal deeqaha, deeqaha waxbarasho iyo daraasada shaqada ka hor amaahda si loo yareeyo daynkaaga kulliyada ka dib. Iska ilaali amaahda gaarka ah iyo kaadhahka kiridhitka, haddii ay suuragal tahay.



COA (Kharashka Soo Xaadirka)  
Deeqaha waxbarasho/Deeqaha

GAL DALOOLADA LACAGTA  
(daraasada shaqada/amaahda/kaydka)

GAL DALOOLADA LACAGTA ugu yar =  
WAXAY LA MID TAHAY DOORASHAD ALA  
AWOODO

- 4. La xidhiidh** xafiiska **kaalmada dhaqaale** ee kulliyada haddii aad hayso su'aalo.

FEBRAAYO: FASALKA 12



**pcccn**  
Puget Sound College and Career Network

Road Map  
Project

WASHINGTON STUDENT  
ACHIEVEMENT COUNCIL  
EDUCATION · OPPORTUNITY · RESULTS

**WCAN** WASHINGTON  
COLLEGE ACCESS NETWORK

**COLLEGE  
SUCCESS  
FOUNDATION**

# 5 CODSANAYA KULLIYADA: QAYBAHA CODSIYADA KULLIYADA

Dhammaan kulliyadaha waxay leeyihiin **codsi**. Caadi ahaan, waxaad soo gudbin kartaa mid xirfad ah, farsamo, 2-sano ama 4-sano kulliyad/jamacad codsi onlayn ah oo wakhiyada qaarkodd qof ahaan ah, ama boosta.

## MAXAAN U BAAHANAY SI AAN U CODSADO KULLIYADAHA BADANKOODA?

**Qolaadaada darajooyinka rasmiga ah** laga bilaabo **dugsiga sare** iyo kulliyada hadii aad shaqaysatay buundo

**Buundooyinkaaga imtixaanka** laga bilaabo **SAT ama ACT**

## WANAAGSAN IN LA OGAADO:

Barnaamijyada qaarkood sida **tababarka shaqada** tababarka xirfada iyo caddaymaha farsamada waxay leeyihiin qaab gooni ah oo codsi ah. Ka eeg **lni.wa.gov** wixii macluumaad dheeraada ah ee ku saabsan tababarka shaqada ama booqo **sbctc.edu** barnaamijyada tababarka xirfadaha ama farsamada.

## \* HA ILAABIN:

Waxaad la tartamaysaa codsadayaal BADAN oo kale. Hubso jawaabahaagu inay cad yihiin oo yihiin wakiilka runta ah ee cida (qofka) aad tahay iyo sida aad naftaada u diyaarinayso!

## TALLAABOYINKEE DHEERAADKA AH AYAA LOO BAAHAN KARAA INAAN DHAMMAYSTIRO 4-SANO CODSIGA KULLIYADA?

**Warbixinta Gaarka ah** – qaabka kulliyada si loo ogaado adiga iyo sababta aad u xiisaynaso dugsiga

**Jawaabaha Su'aasha Gaaban** – su'aalo dheeraad ah oo xooga saaraya fikro gaar ah, sida kala duwanaanshaha, dhaqanka iyo tusaalooyinka sii wadista/ ka gudbida kala duwanaanshaha.

**Diiwanka hawsha/Khinrado shaqo** – liiska **hawlahaha manhajka ka baxsan** oo ay ku jiraan naadiya, ciyaaraha, shaqooyinka iyo wax kasta oo aad qabto oo ka baxsan dugsiga.

**Warqadda kula talinta** – warqad ka socota macalinta, la taliyana, tababaraha, wim, oo ka hadlaysa tayooyinkaaga, sifooyinka iyo kartiyaha.

## WAX KALE?

Waxaad u baahan kartaa inaad bixiso khidmad si aad u gudbiso codsiga kulliyada.

### Si kastaba, waad u qalmi kartaa inaad heshid qidmada ka dhaafida:

- Haddii aad tahay araday Deeqda Waxbarasho ee Bound College
- Haddii aad hesho qado bilaasha ah ama qiimaha la dhimay
- Haddii aad ka qayb gasho barnaamijyada sida TriO, Upward Bound, ama GEAR UP
- Haddii aad tahay dhalin yaro daryeelka korinta ku jira
- Haddii aad qaadatay SAT ama ACT oo leh khidmada ka dhaafida
- La xidhiidh la taliyahaaga dugsiga sare, xafiiska qaabilaada kulliyada, Ururka Qaranka ee La talinta Qaabilaada Kulliyada, ama Guddida Kulliyada si aad wax uga waydiiso wixii ku saabsan khidmada ka dhaafida.

**MAARSO:** FASALKA 11

**OKTOOBAR:** FASALKA 12



## TILMAMAHA CODSASHADA:

**Buuxi oo gudbi ugu yaraan saddex** codsiyada **kulliyada** inta dayrta lagu jiro.

**Codso** **kaalmada dahqaale** addoo buuxinaya **FAFSA** ama **WASFA** goor hore oo Oktoobar 1 ah si loo hubiyo inaad leedahay doorashooyinka lagu bixiyo kulliyada.

**Isticmaal cinwaanka iimaylka xirfad yaqaanka** wadata magacaaga. Inta badan iimaylkaaga eeg, waxaad heli doontaa fariimo, muhiim ah wakhti xasaadi ah.

La hadal lataliyahaaga haddii aanad awoodin inaad bixiso kharashka codsiga. Waxaad u qalmi kartaa **codsiga kulliyada ka dhaafida kharashka**.

**Raad raac muddooyinka loo qabtay** isticmaalka xaashida egsalka ama liiska waxa la qabanayo.

**Khaladka ka eeg, ka sax khaladka oo dib u eeg curisyada kulliyada.** Qof kale ha kula (bare, la taliye, macalin, iwm) eeg codsigaaga la soo gebagebeeyay.

**Eego heerka** kulliyadaada iyo abka kaalmada dhaqaale si loo hubsado in aan la helin. Caadi ahaan tan waxaad ku samayn kartaa **onlaynka ah ee kulliyada**, iimaylka ama telefoonka.

Hubso **inaad kaydiso dhammaan qaybaha codsiga kulliyada**; waxaad aqood u yeelan doontaa inaad dib u isticmaasho kulliyadaha kale ama codsiyada deeqda waxbarasho.

Ka dib markaad gudbiso **codsigaaga**, waa inaad heshaa **fariinta xaqiijinta**. Haddii aanad, la xidhiidh xafiiska qaabildaa kulliyada si aad u ogaato heerka codsigaaga.

## 4-SANO KULLIYADA NIDAAMKA CODSIGA:

**Gudbi** FAFSA ama WASFA haaga.

**Akhri shuruudaha qaabilaada** dugsi kasta oo gaar ah.

**Samee kooto** codsigaaga onlaynka ah.

Codso **warqaddaha lagu amaanayo**.

Codso **qoraalada buundooyinka rasmiga ah**.

Dir buundooyinka **SAT ama ACT**.

Qor ama wax kabeddel **buundooyinkaaga gaarka ah** curisyada iyo **jawaabaha jawaabta** gaaban ee kale.

**Dhammaystir oo gudbi** codsigaaga kulliyada.

Hel **iimaylka xaqiijinta** kaas oo codsigaaga si guuled loo gudbiyay.

## WAA MAXAY CODSIGA CAADIGA AH?

Codsiga caadiga, ama abka caadiga ah, waa qaabilaada kulliyada **codsiga ay isticmaalaan wax ka badan 700 oo kulliyadoo gudaha Maraykanka**, ay ku jirto kulliyadaha gaarka ah ee Washington. Marka abka guud la dhammaystiro, waxaa loo diri karaa tiro kasta oo kulliyadaha ka qayb gelaya ah. Abka guud waxaa gaar ahaan loogu isticmaalaa u qalimid 4-sano kulliyada iyo jaamacadaha. Si aad u bilowdo codsiga caadiga ah, booqo **commonapp.org**.

## 2-SANO KULLIYADA NIDAAMKA CODSIGA:

**Ka codso** onlayn, boostada ama qof ahaanby.

**U gudbi** FAFSA ama WASFA.

Qaado **imtixaanka meelaynta** xaga kulliyada. Kulliyadaha qaarkood sidoo kale waxay aqbalaan qoraalada buundooyinka ama macluumaadka kale si ay u go'aamiyaan meelaynta.

Jadwal ka samayso **la talinta tacliimeed** ballanka.

NOOFAMBAR: FASALKA 12



# 6 ISKU DIIWAANGELINTA KULLIYADA: GAADHIDA GO AANKAAGA

**Waxaad soo gudbisay codsiyadaada kulliyada oo hadda sugida ciyaartu way bilaabantaa.** Tani waxay qaadan kastaa meel kasta laga bilaabo bilaa ilaa dhowr bilood, iyaddoo ku xidhan nooca dugsiga. Kulliyaduhu suuragal ahaan waxay la xidhiidhi doonaan go'aankooda dhexda iimaylka, boostada ama madashooda onlaynka ah. Ha ilaabin inaad ka hubiso qaaxda qaabilada kulliyada haddii aad hayso su'aalo.

## WAXAAN GO'AAN KA HELAY KULLIYADA, MACNAHEEDU WAA MAXAY?

**La ogolaaday** – Waa lagu ogolaaday. Hambalyo!

**Liiska sugiga** – Laguma diidin lagumana aqbalin. Kulliyadu waxay sugaysaa inay aragto int ay tahaya rdayda aqbali doona deeqdooda si loo go'aamiyo, haddii ay hadhay meel dheeraad ahi.

**La diiday** – Laguma aqblain. Ka feker sahaminta doorashooyinka kale ee kulliyada.

**Go'aaminta waxay tahay kulliyada la tegyaa way adkaan kartaa, laakiin helida dugsiga saxda ah ee aad leedahay, waxay kaa caawun kartaa guul iyo qalanjebin. Kala hadal la taliyahaaga dugsiga sare wax ku saabsan doorashooyinka.**

## SIDEEN ISKU BARBAR DHIGAA KULLIYADAHAA?

### Dhaqaalaha:

Ka feker inta uu leeyahay kharashka soo xaadirka ay daboolayaan **deeqaha** iyo **deeqaha waxbarasho**.

Ka feker sida adiga iyo qoyskaagu aad u dabooli doontaa gol daloolda qarashka waxabarashadaada kulliyada oo dhan.

### Tacliinta:

Hubi haddii maadada xooga la saarayo **tacliinta** aad xiisaynaysaa laga geli karo kulliyada. Ka feker noocyada **taageerada tacliinta** la heli karo (tusaale, xarunta qoraalka, waxbarida xisaabta, adeegyada naafada, iwm).

### Bulshadda:

Go'aan ka gaadh haddii kulliyadu ay tahay mid si wanaagsan ugu habboon bulshadda iyo dhaqanka (tusaale, kala duwanaanshaha, kooxaha ardayda, fursaddah waxbarida, iwm).

Ka feker nooca deegaanka aad jeceshahay (u dhow guriga, wayn, banaanka kulliyada, goob miyi ah, iwm).

## \*HA ILAABIN:

Marka aad gaadhay go'aamadaadii kulliyada, waa inaad **ku wargelisaa kulliyada addoo xaqiijinaya diiwaangelintaada**. Wax badan 4-sano kulliyadaha muddada ay dhacaysaa waa Maayo 1.

**MAARSO: FASALKA 12**

**WANAAGSAN IN LA OGAADO:** Tani waa mid ka mid ah go'aanada ugu wayn ee aad samayn lahayd noloshada. **Inaad qaadato wakhti aadkaga fekerto** waxa ay kulliyad kastaa bixinayso. Ha ka baqan inaad rayi ka hesho xubnaha qoyskaaga, macalimiinta ama barayaasha.



# 6 ISKU DIIWAANGELINTA KULLIYADA: U WAREEGIDA KULLIYADA

**Waxaa lagu aqbalay** kulliyada aad jeclaan lahayd inaad dhigato, laakiin tallaabooyin badan ayaa la qaadayaa ka hor inta aanad bilaabin fasalda.

## TALLAABOYINKA 4-SANDO KULLIYADAHA:

1. Bixi qidmada ansixintaada ardaygaaga/diiwaankaaga cusub, mararka qaar loo yaqaan "dabaaji". Haddii aysan kuu suurtoogleyn inaad bixisid **qidmada**, la xiriir zafiiskaaga diiwaangelinta oo weydii inay dib u dhigaan dabaajigaaga.

2. Ka codso **qoraalada buundooyinka rasmiga ah** dugsiagaagii sare iyo kulliyad kasta oo aad buundooyin ka heshay. U dir qoraalada buundooyinka kulliyadaada sida ugu dhakhsaha badan ee u dambaysa darajooyinka waa la soo geliyay.

## TALLAABOYINKA 2-SANDO KULLIYADAHA:

1. **Gudbi** wixii ah foomamka iyo **kaalmada dhaqaale ee kale ee la codsaday** muddada loo qabtay.

2. **Dhamaystir** tallaabooyinka meelaynta xisaabta iyo **Ingiriisiga** ee kulliyadaada.

## GURIYAYNTA

**Guriyanta jaamacada** waxaa ku jiri kara hoolalka la dego, qaybaha dabaqyada ama guryaha. Codsii inaad xarunta (xaramka) jaamaca ku noolaado oo hubso inaad bixiso deebaajiga guriyayntaada muddada loo qabto. La xidhiidh xafiska guriyaynta wixii ah su'aalo kasta.

**Guriyaynta jaamacada ka baxsan** doorashooyinka waxa ku jira ku noolaanshaha guriga, kiraysashada qayb dabaq ah/guri ama ku noolaanta guryaha walaalnimada iyo hablaha wada dega.

## MAXAAN U BAAHANAHAY INAAN SAMEEYO KA HOR INTA AANAD BILAABIN KULLIYADA?

- Xaqiiji aqbaladaada** addoo soo gudbinaya caddayntaada diiwaangelinta iyo deebaajigada Maayo 1 ama muddada ay u qabatay kulliyadaadu.
- Aqbal** **abaalmarintaada kaalmada dhaqaale.**
- Qorshayso** **taladaada iyo tababarka ballamaha.**
- Codsashada guriyaynta haddii** aad dooranayso inaad ku noolaato **aaga jaamacada.**
- Soo gudbi diiwaanadaada tallaalka.** Ka hel diiwaanadan dhakhtarkaaga ama dugsiaga degmadda.
- Haddii aad u qalanto, **ku biir barnaamijyada taageerada ardayga** (waa loola jeedaa TRIO, EOP, CAMP) kaa caawin doona **la talinta tacliinta**, kharashka waxbarashada, kaalmada dhaqaale, iwm.
- Isku diiwaan geli fasalada.**

## WANAAGSAN IN LA OGAADO:

Haddii aad ku jirto kulliyada bulshadda ama farasamada oo 2 sano ah oo aad qorshaynayso kulliyad 4 sano ah mustaqbalka, la hadal la taliyahaaga wax ku saabsan koorsooyinka la qaadanayo. **Dhammaan duruusta 2-da sano uma wada wareegaan kulliyadaha 4-ta sano ah.**

## MAXAY TAHAY JIHAYNTU?

Kuuliyadaha badankoodu waxay u baahanyihiin ardayda cusub inay soo xaadiraan **tababarka jihaynta**, halka ay ku bartaan wax ku saabsan **xarunta kulliyada** goobaha, isku diiwaangelinta fasalada iyo la kullanka filka. Qaar ka mid ah jihaynta kulliyadaha waa qof ahaan kuwa kalana waa onlayn. U kaalay qof ahaan tababarka jihaynta haddii aad karto! Waxaa lagugu marti qaadi karaa inaad soo xaadirto barnaamijka wareejinta xagaaga ee xooga saaraya u diyaar garayntaada saddexdaada bilow ee u horeeya.

**ABRIIL: FASALKA 12**



# 6 ISKU DIIWAANGELINTA KULLIYADA: WAXA AAD FILAYSO XILIGAAGA WAXBARASHO EE KOOWAAD

**Beddelku waxa uu aad uga duwanyahay dugsiga sare qaabab badan.** Waa muhiim in la ogaado waxa la filayo, markaas waxaad noqon kartaa mid guuleh.

## MAXAY TAHAY INAAN WAXAAN SAMEEYAA MARKA KOOWAAD?

**Hel** cunto, guri, gaadiid, xarumo caafimaad, caafimaadka dhimirka iyo goobaha jidh dhisnaanta ee goobta waxbarashadda.

**Baro** halka aad ka heli karto taageero waxbarasho oo samee kooxo waxbarasho.

**Baro** ardayda fasalkaaga. Fasaladu way yaraan karaan (30 qof) ama ka wayn (500 qof) iyaddoo ku xidhan kulliyadaada. Waxaad kula kulmi doonyaa dad badan oo cusub dhexda fasalada, dhacdooyinka iyo naadiyada, waad ku xidhmi kartaa oo waxaad noqon kartaa qayb bulshadda ah.

\* **Saacad kasta oo aad ku qaadato fasalka, waa inaad ku qadataa ugu yaraan labba saacadood oo shaqada waxbarashada ah.**

## WANAAGSAN IN LA OGAADO:

**Weligaa ha ka baqan inaad caawimo waydiisato** – marka la shakiyo, la xidhiidh!

Kulliyadu waxay noqon kartaa wakhti ka mid ah wakhtiga ugu wanaagsan nolashaada, laakiin waxay sidoo kale noqon kartaa mid aad u adag. Xusuus sababta aad doonayso inaad kulliyada u tagto. Tani waxay kaa caawin doontaa inaad ku dhiiranaato inaad dhammayso **digriigaaga**

## TAG MID KASTA OO TILMAAMAHA MIISAANIYADA AH?

Buuggaagta iyo qoraalada waa qaali. **libso ama lacag ku amaanayso** si aad lacag u kaydiso; qababka korontada sidoo kale waa la heli karaa.

**Jar kharashka maalinlaha ah ee aan lama huraanka ahayn** (dibad ka soo cunida, bunka subaxda, baabuur dhigashada q aybta kulliyada, iwm).

Samee **miisaaniyada saddex bilood ah ama simisyar ah** ooku dhegenow!

## SIDEEN WAKHTIGAYAGA UGA FAA'IIDAYSTAA?

\* FFasalada qaar waxay kulmaan maalin walba iyo qaarkood waxay kulmaan haljeer isbuucii. Waxay bilaabi karaan sida ugu horeyso ee 8 a.m. iyo sida ugu daahsan ee 8 p.m. **Aasaas jadwalka fasalka oo adiga kugu haboon.** Sii nafsadaada waqti badan oo cuntooyinka, layliga guriga, safarada gaaban, iyo dhaxgelida bulshadaada.

\* Ka raadso caawmimo saaxiibada, barayaasha ama goobaha xaramka ama **borofasoorada** muddada **saacadaha xafiiska.**

\* Kulliyada waxaad haysaa **xoriyad badan** jadwalkaaga, oo qofka kuuma sheegayo halka aad u baahantahay inaad joogto ama marka. Waxaad isku mar ka hawshoon fasalada, hawalaha bulshadda, saaxiibada, dhaqaalaha iyo laga yaabaa xataa xaalad cusub oo noloshu ah ama shaqo. **Ku maamul wakhtigaaga adoo dheeli tiraya shaqadaa guri iyo xiisaha gaarka ah.**

MAAYO: FASALKA 12



# 6 ISKU DIIWAANGELINTA KULLIYADA: ILAHA KULIYADA EE AAD U BAAHANTAHAY INAAD ISTICMAAHSO

**Kulliyadaha waxay bixin karaan ila badan si ay kuu caawiyaan** adigu inaad noqoto mid guulaysta. Dhammaan waxa ku jira **kharashkaaga waxbarashada** iyo **kharashyada**, markaas isticmaal iyaga!

## XAGEEN U DOONTAA TAAGEERADA TACLIINTA?

**La talinta kulliyadaha:** Waxa uu caawiyaa fahanka nidaamyada tacliinta kulliyada, doorashada iyo codsiga **maadaha ahmiyada la saaro** iyo helida **ilaha** goobta jaamacada.

**Maktabadaha:** Waxa uu bixiyaa meelo waxbarasho oo kala duwan halkaas oo aad ka heli karto caawimada cilmi baadhida iyo la shaqaynta kuwa kale.

**Xarumaha waxbarida gaarka ah:** Waxay caawimo ka bixisaa maadooyinka sida qoraalka iyo xisaabta ee filkaaga.

**Saadaha shaqada:** Wakhtiyada marka **barofosooradaadu** la hgelgi karo inay ka jawaabaan su'aalaha aad hayso ee ku saabsan fasalka.

## XAGEEN KA HELI KARAA TAAGEERO LA GAARYEELAY?

**Xarunta mihnada:** Waxay ku siisaa la talinta mihnada iyo caawimada horumarinta khibrado shaqo, qoraalka faahfaahinta shaqo doonimadaada iyo u diyaar garowga waraysiga shaqada.

**Xarunta Kala duwaanshaha/dhaqanada badan:** Meesha ardayda midabka iyo bulshooyinka kale si loo helo taageerada bulshadda iyo dareenka oo waxay dareemaan badbaado si loo muujijo fikradahooda iyo khibradaha.

**Adeegyada la talinta:** Waxay adiga ku siisaa la talinta qarsoodiga ah iyo taageerada caafimaadka masxkada.

**Ilaaha naafada:** Waxay siisaa habbaynta macquulka ee tacliinta ardayda u qalanta.

**Macluumaadka teknoolajiga (IT):** Waxay bixisaa adeegyada teknoolajiga ka duwan oo waa meesha ugu horaysa ee codsiyada la xidhiidha teknoolajiga goobta jaamacada.

**Adeegyada ruug cadaaga:** Waxay u shaqaysaa sidii isku xidhaha Waaxda Arrimaha Ruug cadaaga oo waxay caawisaa wareegida dadkii ciidaha hore ahaan jiray ee ka wareegaya ciidanka ilaa noloshu tacliinta.

## KAALMADA DAHQAAALAH IYO TAAGEERADA DEEQDA WAXBARASHO?

**Xafiiska kaalmada dhaqaale:** Waxa uu kaa caawiyaa inaad fahanto **kaalmada dhaqaale** abaal marinta oo waxa uu bixiyaa macluumaadka ku saabsan ilaha maalgelinta dheeraadka ah oo waxa uu kaa caawiyaa inaad raadiso oo codsato **deeqaha waxbarashadda**.

## HALKEEN KARAA ANIGU INAAN KA QAYB QAATO?

**Ururka ardayda:** Waxa uu bixiyaa meelo, dhacdooyinka, kooxaha waxbarasho iyo deegaan raaxo leh halka aad ku xidhmi karto kulliyada bulshadda.

**Noloshu ardayga:** Waxay bixisaa fursado badan oo goobta jaamacada ah.

**Xafiiska waxbarashadda dibada:** Waxay siisaa khibrado safar caalami ah oo macni buuxa leh buundada kulliyada.

**Xarunta raaxaysiga iyo barnaamijyada:** Kulliyado badan waxay leeyihiin jiimka, garoomada ciyaaraha, fasalada jidh dhiska ama naadiyada ciyaaraha.

MAAYO: FASALKA 12

